# Caawinta Shaqo La'aanta ka dhalatada Musiibooyinka:

# Su'aalaha Inta badan La Isweydiiyo

**Waa maxay Caawinta Shaqala'aanta ka dhalata Musiibooyinka (DUA)?**

Tallaabada ugu horreysa waa codsi-raadinta caymiska shaqo-la'aanta (UI). Waxaad ku buuxin kartaa qadka telefoonka ama shabakada internetka adigoo ka codsanaya bogga Internetka ee Wasaarada shaqaalaha , my.vermont.gov - gal. Inta lagu jiro xaaladaha degdegga ah dad badan oo sidadaada oo kale ay u sameysey ayaa codsanaya kaalmooyinka shaqo la'aanta, waxaana laga yaabaa in waqti dheer aad sugi doonto . Haddii aadan kombuyuutar laheyn, booqo xarunta VDOL Job Center ee u adeega deegankaga. Meesha kugu dhow waxad ka helaysaa halkan: https://labor.vermont.gov/workforce-development/job-centers

**Sidee ayay DUA u shaqeysaa?**

Barnaamijka DUA waxaa maamula Waaxda Shaqada ee Federaalka iyo FEMA (Maamulka Maareynta Degdegga ah ee Federaalka - wakaalada ka shaqeysa masiibooyinka). Ka dib marka masiibo weyn uu ku dhawaaqo Madaxweynaha, FEMA waxay lacag siisaa Waaxda Shaqada ee gobolka si ay u bixiso dheefaha DUA. Gobolka ayaa sidoo kale loo soo celinayaa kharashaadka socodsiinta barnaamijka. Vermont gudaheeda, Waaxda Shaqadu waxay mas'uul ka tahay bixinta dheefaha DUA. Waaxda Shaqada ee Vermont ayaa ku dhawaaqi doonta marka faa'iidooyinka ay diyaar yihiin waxayna siin doontaa dheefaha dadka u qalma.

**Ilaa intee ayaan heli karaa gargaarka?**

Haddii aad u qalanto DUA gudaha Vermont, waxaad heli kartaa faa'iidooyin ilaa 27 usbuuc ka dib marka lagu dhawaaqo musiibada. Ilaa inta shaqo la'aantaadu ay tahay sababta masiibada, waxaad sii wadi kartaa helitaanka dheefaha.

**Yaa codsan kara DuA?**

Si aad u codsato DUA, waxaad u baahan tahay inaad ka soo baxdo mid ka mid ah shuruudahan:

a) Waxaad ahayd shaqo la'aan usbuuc ka dib markii ay masiibada bilaabatay.

b) Ma aadi kartid shaqadaada.

c) Shaqadaadu mar dambe ma sii jiri doonto masiibada awgeed, ama ma gaadhi kartid.

d) Hadda waxaad tahay taageeraha ugu weyn ee qoyskaaga sababtoo ah odaygii reerka ayaa ku dhintay masiibada.

e) Ma shaqayn kartid sababtoo ah waxaad ku dhaawacantay masiibada.

f) Ma bilaabi kartid shaqada masiibada darteed.

Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, waxaad weli heli kartaa DUA haddii laguu ogolaado inaad ka shaqeyso Maraykanka oo aad buuxiso shuruudaha qaarkood.

**Miyaan u baahanahay inaan codsado shaqo la'aanta joogtada ah ka hor DuA?**

Haa, marka hore waa in aad codsataa kaalmooyinka shaqo la'aanta caadiga ah. Haddii aadan xaq u lahayn manfacyada caadiga ah, markaa waxaad xaq u yeelan kartaa DUA. Codsigaaga/sheegashadada hore , waxaa laguu waydiin doonaa haddii shaqadaada ay saamaysay musiibadu.

**Immisa lacag ah ayaan heli doonaa?**

Lacagta kaalmada ah ee isbuucii waxaa lagu saleynayaa mushaarka guud ee uu qofku helo 2022. Haddii uu qofku iskiis u shaqeeysto, caddadka lacagta faa'iidada ee toddobaadlaha ah waxaa lagu saleynayaa dakhliga saafiga ah (dakhliga saafiga ah ee usoo xaroonaye sanadka 2022). Guud ahaan, faa'iidooyinka waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo la isticmaalayo qaabka isku midka ah ee loo isticmaalo faa'iidooyinka gobolka UI. Xisaabinta waxaa laga heli karaa: VT Dept Labor - B11Claimant.

**Degmooyinkee Vermont ayaa heli kara DUA?**

Laga bilaabo Luulyo 18, degmooyinkan Vermont waxay xaq u leeyihiin DuA: Sida ay go'aamisay FEMA:

• Chittenden (Waxay iclaamisey July 20, 2023, codsiyada waxaa ugu danbeyn la qabanayaa August 21, 2023)

• Lamoille (Waxay iclaamisey July 20, 2023, codsiyada waxaa ugu danbeyn la qabanayaa August 21, 2023)

• Rutland(Waxay iclaamisey July 20, 2023, codsiyada waxaa ugu danbeyn la qabanayaa August 21, 2023)

• Washington (Waxay iclaamisey July 20, 2023, codsiyada waxaa ugu danbeyn la qabanayaa August 21, 2023)

• Windham (Waxay iclaamisey July 20, 2023, codsiyada waxaa ugu danbeyn la qabanayaa August 21, 2023)

• Windsor (Waxay iclaamisey July 20, 2023, codsiyada waxaa ugu danbeyn la qabanayaa August 21, 2023)

Caledonia (Waxay iclaamisey July 24, 2023, codsiyada waxaa ugu danbeyn la qabanayaa August 24, 2023)

Orange (Waxay iclaamisey July 24, 2023, codsiyada waxaa ugu danbeyn la qabanayaa August 24, 2023)

**Waa maxay dukumeenti aan u baahanahay si aan u codsado DUA?**

Markaad codsanayso DUA, waxaad u baahan tahay inaad heysto:

a) Lambarkaaga Bulshada

a. Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, lambarkaaga diiwaangelinta shisheeyaha iyo taariikhda uu dhacayo

b) Magaca iyo cinwaanka loo-shaqeeyahaaga ugu dambeeyay

c) Haddii aad ka shaqeysay gobol kale labadii sano ee la soo dhaafay, magaca iyo cinwaanka loo shaqeeyaha

d) Haddii aad iskaa u shaqeysato, caddaynta iskaa u shaqeysiga labadii sano ee la soo dhaafay (sida canshuur celinta ama diiwaannada bangiga)

e) Haddii aad leedahay shaqo jadwalsan laakiin aad shaqayn kari wayday masiibada awgeed, magaca iyo ciwaanka loo shaqeeyaha iyo taariikhda aad ku qasban tahay inaad shaqeyso.

**Maxaa dhacaya haddii cabashadayda rafcaan laga qaato?**

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka ku saabsan dacwadaada DUA, waxaad haysataa 60 maalmood oo aad rafcaan ka qaadato. Codsiga DUA waxaa lagu go'aamin doonaa 30 maalmood gudahood. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka rafcaanka, waxaad haysataa 15 maalmood oo aad uga dacwooto Maamulaha Gobolka. Maamulaha Gobolku waxa uu go'aan ku gaadhi doonaa 45 ama 90 maalmood gudahood, taas oo ku xidhan marka ay helaan racfaankaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah booqo websaydkayaga www.labor.vermont.gov